

Hadii loo baahdo waxaad xaq u leedahay adeega turjumaanka luqadda. Fadlan na soo war gali baahidaada turjumaanka markaad qabsaneyso balantaada. Shaqaalaha daryeelka caafimaadka ayaa kadib kuu diyaarin doona turjumaan ka socda hay'adaha turjumaada.

Hadii aanad ku qanacsaneyn daryeelka caafimaadka

Waxa aan rabnaa in aad hesho daryeel wacan iyo in aad raali ku tahey. Sidaas daraadeed waa muhiim in aad noo sheegto waxa filayso in ay fiican yihiin iyo waxa xunba.

La hadal shaqaalaha

Ka bilow in aad la hadasho shaqaalaha ku daryeelaaya ama madaxa ka masuulka ah

Talo iyo caawimo laga helo gudiga bukaan socodka

Hadii dhibaataada la xalin waayo waxa aad adigu ama qof kuu dhow la soo xidhiidhi karaa kaaliyaha gudiga bukaan socodka. Gudiga bukaan socodka ayaa ku taageeraysa oo ku caawinaysa hadii aad fikrad ka qabto caafimaadka- iyo daryeelka bukaanka ee degmada (xataa daryeelka ilkaha ee dadweynaha) iyo degmooyinka gobalka. Gudiga bukaan socodka waxa qabanaaya xeerka amusnaanta.

Sida sharciga waafaqsan waa in gudiga bukaan socodka

- kor u qaadaan xidhiidhka ka dhexeeya bukaan socodka iyo shaqaalaha daryeelka
- caawiya bukaan socodka si ay u helaan warbixinta ay u baahan yihiin si ay ahmiyadooda caafimaadka- iyo daryeelka bukaan socodka gacan uga geystaan.
- u tilmaama hay'ada dawlada ee ku haboon
- soo war galiya daryeel bixiyaha iyo laanta daryeelka indho-indheynta iyo khilaafaadka.

U gudbinta warbixin Gudiga Qaranka ee Caafimaadka iyo Daryeelka

Waxaad u gudbin kartaa Gudiga Qaranka ee Caafimaadka iyo Daryeelka. Shaqadoodu waa inay baadhaan cabashooyinka ku sabsan caafimaadka iyo daryeelka daaweynta, daryeelka ilkaha iyo shaqaalaha ka shaqeynaaya meelahaas. Si aad u gudbiso warbixin uma baahnid xataa inaad magacawdo, awa aanad ogsooneyn, qofka sameeyay qaladka iyo waxa sababey dhaawaca. Gudiga Qaranka ee Caafimaadka iyo Daryeelka waxay baadhi kartaa dhamaan dhacdada ee maaha kaliya ficilka shakhsi kaliya. Muhiimada baadhitaanku waa in la helo sababta dhibaataada iyo waxa loo baahan yahey in la sameeyo si aan marlabaad kanoo kale u dhicin. Sidaad la ajligeed daryeelka daaweyntu waxa uu noqon doonaa mid sugan. Hadii aad rabto inaad wax dheeraad ah ogaato fadlan la xidhiidh Xafiiska Guriga Bukaansocodka.

Macluumaadka lagala soo xidhiidho

Socialstyrelsen

Enskildas klagomål

106 30 Stockholm

Hadii loo baahdo waxaad xaq u leedahay adeega turjumaanka luqadda. Fadlan na soo war gali baahidaada turjumaanka markaad qabsaneyso balantaada. Shaqaalaha daryeelka caafimaadka ayaa kadib kuu diyaarin doona turjumaan ka socda hay'adaha turjumaada.

Cinwaanka Internedka www.socialstyrelsen.se/klagapavarden

Ogow in warbixintaadu ay noqon doonto wax dadku wada heli karaan iyadoo ay cid kastaa heli karto haday dalbato.

Caymiska bukaan socodka

Hadii dhaawac ku soo gaadhey iyadoo lagugu daaweynaayo dhakhtar, rugta dhakhtarka ama tan ilkaha waxa marmarka qaar shaqeeya caymiska bukaan socodka. Taas micnaheedu waxa weeye in marka la fiirsado ka dib aad heli karto magdhow. War galinta waxa la sameynayaa sadex sano gudahood. Hadii aad rabto in aad wax dheeraad ah ogaato, la xidhiidh kaalihaya gudiga bukaan socodka.

Macluumaadka lagala soo xidhiidho:

Landstingens Ömsesidiga Försäkringsbolag

Box 178 30, 118 94 Stockholm

Tel 08 551 010 00

Internet address www.patientforsakring.se

Caymiska daaweda

Hadii aad wax ku noqoto daawo lagu iibiyey Iswiidhan waxa aay soo wargelin kartaa caymiska daawada. Ka fikir in aanad magdhow ku helaynin saameynaha yimaada marmarka qaarkood ama hadii waxyeelada ay keentay qalad u isticmaalid. Wargeli waxyeelada ugu danbeyn sadex sano ka dib markaad ogaato.

Macluumaadka lagala soo xidhiidho:

Läkemedelsförsäkringen

Försäkringsbolaget Zürich

Box 5069

102 42 Stockholm

Tel 08 57 93 30 00

Internet address: www.lakemedelsforsakringen.se

Ma rabtaa in aad qof gargaara noqoto?

Gudiga bukaan socodku waxa ay masuuliyad ka saaren tahey si ay u cayimaan qof gargaara bukaan socodka qasabka lagu daryeelo ee qaba xanuunka maskaxda. In aad noqoto qof gargaara waxa weeye in laga caawiyo bukaan socodka su'aalahooga shakhsiga iyo in aad xidhiidh joogto ah la sameyso gudiga bukaan socodka. Markaad tahey dadka gargaara waxa lagu siin waxbarasho, gargaar iyo kalkaalin iyo taageero dhaqaale. Soo war-gali dalabkaaga kaaliyaha gudiga bukaan socodka.

La xidhiidh kaaliyaha gudiga bukaan socodka ee Maamulka Gobola Kronoberg

Tel 0470-58 85 42, eboost: patientnamnden@ltkronoberg.se